Oregon Department of Human Services
INTELLECTUAL/DEVELOPMENTAL DISABILITIES

Farriintani waxaa la soo geliyay iyada oo ah Ingiriisi waxaan si dhakhso ah loo soo gelin doonta iyada oo ah Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese: https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Oktoobar 25, 2021-ka

Ku socota: Daryeel Bixiyayaasha iyo Hawl wadaagayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka
Ujeedada: Qiyaasaha tallaalka xoojinta ah oo la ballaariyay

Qiyaasaha tallaalka xoojinta ah ee loogu talagalay tallaalada Pfizer, Moderna iyo Johnson & Johnson COVID-19 ayaa hadda la helayaa.

Qiyaasaha tallaalka xoojinta ah ee tallaalada Pfizer iyo Moderna labadoodaba ayay heli karaan kooxo gaar ah oo qaatay laba qiyaasood oo ah Pfizer iyo Moderna ugu **yaraan 6 bilood**ka hor. Kooxaha u qalma Pfizer am Moderna waxaa ka mid ah:

- Dadka da'doodu tahay 65 jir iyo ka weyn
- Dadka da'doodu tahay 18 jir iyo ka weyn ee ku nool goobaha daryeelka muddada fog
- Dadka da'doodu tahay 18 jir iyo ka weyn ee qaba xaalado caafimaad oo hoose ama halis sii kordhaysa ugu jira sinnaan la'aanta bulshada, naafanimada, oo ay ku jiraan naafanimada maskaxda iyo korriinka
- Dadka da'doodu tahay 18 jir iyo ka weyn ee ku nool ama ka shaqeeya goobo halis sare leh.

Qiyaasaha tallaalka xoojinta ah ee tallaalka Johnson & Johnson ayaa waxa heli kara qof kasta oo da'diisu tahay 18 jir iyo weyn ee qaatay Johnson & Johnson **ugu yaraan 2 bilood** ka hor.

Dadka u qalmaa waxay dooran karaan tallaalka ay qaadanayaan isaga oo ah tallaalka xoojinta ah. Dadka qaar ayay dhici kartaa in ay doorbidaan nooca tallaalka ee ay markii hore qaateen iyada oo kuwo kalena ay dhici karto in ay doorbidaan in ay qaataan tallaalka xoojinta ah oo kale. Talo soo jeedinta CDC ee hadda ayaa oggolaanaysa qaadashada noocan ah isku dhafka iyo isku-darka qiyaasaha tallaalada xoojinta ah.

ODDS, hay'adaha maamulka kiiska iyo daryeel bixiyayaasha ayaa taageeray dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka si ay u helaan COVID-19 tan iyo markii dadaalkani bilaabmay. Hay'adaha maamulka kiiska iyo daryeel bixiyayaasha waa in ay ku xirmaan dadka ka tirsan adeegyada ee u qalma qiyaasta tallaalka xoojinta ah iyo xaqiijinta in ay haystaan helitaan iyo taageero.

Haddii aad isla hadaba taageero u codsaday qof si uu helo tallaal xoojin ah isaga oo jooga gurigiisa u gaarka ah oo ay sabab u tahay awood la'aanta helitaanka dhacdada bulshada ama farmashiyaha ganacsiga, ma jirto baahi ah in dib loo gudbiyo xogta. ODDS waxay si toos ah macluumaadka ula wadaagtay Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA).

OHA ayaa leh foomka taageerada farsamo halkaasi oo daryeel bixiyayaasha, hay'adaha maamulka kiiska iyo dadku ay codsan karaan taageerada helitaanka tallaalka COVID-19, oo ay ku jiraan kuwa bilawga ah ama qiyaasaha tallaalka xoojinta ah. Gaar ahaan, foomka waa in ay isticmaalaan daryeel bixiyayaasha guryaha koox ahaanta loo degan yahay iyo daryeelka guriga dadka waayeelka ah ee I/DD ee leh dad degan iyo shaqaale u baahan taageerada tallaalka, ama dadka helaya adeegyada guriga-dhexdiisa ee, sabab kasta ha ahaatee, aanan gurigooda ka bixi karin si ay u helaan tallaal. Hay'adaha maamulka kiiska waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay foomka u buuxiyaan dadka ka tirsan adeegyada ee ay dhici karta in ay u baahdaan helitaanka tallaalka.

Tallaalada COVID-19 oo dhan waa kuwo lacag la'aan ah oo si ballaaran loo heli karo iyada oo la adeegsanayo farmashiyayaasha, xafiisyada dhakhtarka, xarumaha caafimaadka oo federaal ahaan la aqoonsan yahay, iyo xarumaha tallaalka.

Macluumaad dhanka muuqaalka ah:

- Qiyaasaha tallaalka xoojinta ah, qiyaasta tallaalka ee saddexaad waxaa loogu talagalay dadka difaaca jirkoodu liito

- Warqada macluumaadka ee Qiyaasaha Tallaalka COVID-19
- Kaarka Bulshada ee Qiyaasaha Tallaalka COVID-19
- Xaqiiqooyin degdeg ah: Qiyaasaha Tallaalka Xoojinta ee COVID-19
- Su'aalaha Inta Badan La Iska weydiiyo Qiyaasaha Tallaalka Xoojinta ee COVID-19

Qoraalada blogga:

- Qiyaasaha tallaalka xoojinta ee loogu talagalay kooxo gaar ah waxaa talo ahaan ku soo jeediyay Western States Scientific Safety Review Workgroup
- El Grupo de Trabajo de Revisión de Seguridad Científica de los Estados Occidentales aprobó el uso de dosis de refuerzo para gr upos específicos recomendados.

Si Daacadnimo leh,

Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada

dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.